

**Magaca Musharaxa:** **Julie Kang**
**Magaca Ololaha:** **Julie oo Seattle u joogta Degmada 5aad**
**Mareegta ololaha:** **https://julieforseattle.com/**
**Booska:** **Golaha Magaalada, Degmada 5aad**
**Lambarka Taleefanka Ololaha:** **206.880.3873**
**Hordhaca Musharraxa (xadka 200-eray):**

Waxaan muddo dheer deganaa Degmada 5aad, ahaana macallin, iyo xubin firfircoon oo bulshada ka tirsan. Anigoo ah qof soo galooti ah oo noloshayda ka dhisay Waqooyiga Seattle, waxaan fahansanahay sida go'aamada magaaladu u qaabeeyaan xaqiiqada maalinlaha ah ee qoysaska shaqeeya, soo galootiga, iyo ganacsiyada yar yar.

Waxaan u baahanahay in hoggaamiyeyaasheenu ay dhegeystaan, oo ay fahmaan waxa degmadeenu dhab ahaan u baahan tahay. Mudnaantayda waa qiima la awoodi karo, guryo qiimo jaban, badbaadada iyo Hoy La'aan, iyo ilaalinta soo galootiga.

Noloshayda xirfadeed waxaan ku qaatay waxbarasho dadweyne iyo mid sare, anigoo tababaraya macallimiinta si ay u taageeraan ardayda luqadaha badan ku hadasha. Waxaan ka soo shaqeeyay Jaamacadda Washington iyo Jaamacadda Seattle, anigoo hoggaaminaya oo naqshadeynaya barnaamijyo ballaaran, maamulaya miisaaniyadaha dadweynaha ee adag, iyo dhisidda iskaashiyo ka dhexeeya qaybaha kala duwan oo diiradda saaraya isla xisaabtan, U sinaashaha, iyo natiijooyinka.

Waxaan ka tirsanahay guddiga Bulshada Haller Lake Club, waxaan iskaa wax u qabso uga shaqeeyaa kaydka cuntada, waxaan wax baraa bulshada soo galootiga ah waxaanan qaybiyaa qalabka foorida, waxaana hoggaamiyaa socodka FuseD5 si aan u taageero ganacsiga yar. Waxaan ahay xubin ka tirsan ururka shaqaalaha WEA oo ku faanaya, ninkayguna waa xubin ka tirsan UFCW 3000.

Waxaan Gudiga Maamulka Magaalada u keeni doonaa aqoonta bulshada, khibradda bangiyada, khibradda xeerarka iyo hoggaaminta joogtada ah. Waxaan ballan qaadayaa inaan noqdo hoggaamiyaha ay bulshadeennu u baahan tahay - qof dhegeysta oo u dooda kuwa aan codka lahayn.

Sharaf ayay ii tahay inaan taageero kaa helo oo aan matalo degmadeena.

*Musharaxani wuxuu ka qayb qaadanayaa Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda.*



**Magaca Musharaxa:** Silas James

**Magaca Ololaha:** Silas oo Seattle u tartamaya

**Bog-khadka ololaha:** https://silasforseattle.com/

**Jagada Magaalada:** Golaha Magaalada ee Degmada 5aad

**Lambarka Taleefanka Ololaha:** (425) 224-5463

Waxaan ahay Silas James, waxaana u tartamayaa Golaha Magaalada Seattle ee Degmada 5-aad si aan magaaladeena uga dhigo mid si fiican ugu shaqeysa qof kasta. Anigoo ah macallin leh Naafanimo, cilmi-baare, u-doode, iyo Guddoomiyaha Guddiga Naafanimada ee Seattle, waxaan ka niyad jabay nidaamyadeena khariban. Waxaa iga go'an inaan hubiyo in shirkadaha qaniga ah ay bixiyaan saamigooda saxda ah, ballaarinta guryaha la awoodi karo, iyo abuurista xalal ku salaysan bulshada si loo helo badbaadada dadweynaha iyo caddaaladda cimilada. Haddii aan Seattle ka dhigno meel u shaqeysa deriskeena ugu nugul, qof walba wuu faa'iidi doonaa.

Inta badan noloshayda waxaan isticmaalayay cawimada dadweynaha; waayo-aragnimadaas awgeed waxaan noqday khabiir ku takhasusay nidaamyadan adag. Waxaan u hagayay dadka mid mid oo kooxo ayaan baray sida loo guuleysto, laakiin hadda waa waqtigii la hagaajin lahaa nidaamyada laftooda, markaas Seattle oo dhan ayaa ka faa'iideysan doonta.

Waxaan u tartamayaa inaan dadka siiyo agabka ay u baahan yihiin si ay u guuleystaan iyo in xaafadaheenu ay amaan u ahaadaan dadka iyadoon loo eegin cidda ay yihiin, meesha ay ka yimaadeen, ama inta lacag ah ee ay haystaan.

Waxaan kaa codsanayaa inaad taageerto ololahayga adigoo Silas u qoondeynaya Foojarrada Dimuqraadiyadda Seattle. Hubi in mustaqbalka magaaladeena aan anagu leennahay, ee aysan lahayn shirkadaha bilyaneerka ah.

*Musharaxani wuxuu ka qayb qaadanayaa Barnaamijka Foojarka Dimuqraadiyadda*.